# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# GOLAHA SHACABKA BAARLAMAANKA 11AAD EE SOOMAALIYA

## QARAAR KU SAABSAN

## ANSIXINTA R/WASAARAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## Mudane Xamse Cabdi Barre

**Muqdisho:** Juun 25, 2022

Tix: *GSH/B11/02/22* Taariikh: Juun 25, 2022
Kalfadhiga: *1aad*
Kulankiisa gaarka ee: *1aad*

## GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkey:** | Qodobka 69-aad faqradiisa (2) (d) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Qodobka 51aad Faqradda 2aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka; |
| **Markuu Arkey:** | Xeer Madaxweyne Lr. 14 ee Juun 15, 2022 kuna saabsan Magacaabis Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya; |
| **Markuu Arkay:** | Taariikh Nololeedka Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ee magacaaban; |
| **Markuu Arkay:** | Soojeedinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Lam. MJFS/Note 001GGSH/6/22 kuna taariikhsan Juun 16, 2022 oo Golaha soo gaartay 18/06/2022 kuna saabsan Soo Gudbin Magacaabistii Ra'iisal Wasaaraha X.F.S; |
| **Markuu Dhageysatay:** | Hadaljeedinta iyo Barnaamijka Xukuumadda oo kooban ee Ra'iisal Wasaaraha magacaaban M.ne Xamse Cabdi Barre; |

## WUXUU XEERIYEY QODOBBADAN:

### Qodobka 1aad:

Iyadoo ay goobgooj yihiin 220 (laba boqol iyo labaatan) Xildhibaan oo codeenaya, Golaha Shacabka Soomaaliyeed wuxuu Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya M.ne Xamse Cabdi Barre kalsooni ku siiyey aqlabiyad 220 (laba boqol iyo labaatan) Xildhibaan oo "oggol" ah ma jirin xildhibaan diiday ama ka aamusay.

### Qodobka 2aad:

R/Wasaaraha cusub waxaa laga doonayaa in xubnaha Golaha Wasiirada Federaalka iyo Barnaamijka Xukuumadda oo faahfaahsan Golaha Shacabka ku horkeeno muddo aan ka badnayn 30 casho si waafaqsan Qodobka 51(3) ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.

### Qodobka 3aad:

Qaraarkani wuxuuna hirgelayaa marka uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

**M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**